



## Badbaadada Tallaalada COVID-19

### Waxa aad u baahan tahay in aad ogaato

- Tallaalada COVID-19 waa kuwa **ammaan ah oo waxtar leh**.
- Malaayiin qof oo ku nool Maraykanka ayaa qaatay tallaalada COVID-19 iyada oo loo marayo kormeerka dhanka badbaadada ugu wanaagsan ee taariikhda Maraykanka.
- CDC waxay kugula talinaysaa in aad sida ugu dhaqsiiyaha badan u qaadato tallaalka COVID-19.
- Dad badan ayaa soo sheegay kaliya waxyeellooyin sahlan markii ay qaateen tallaalka COVID-19 ka dib.

### Malaayiin qof ayaa si badbaado leh u qaatay tallaalka COVID-19

In ka badan 272 milyan oo qaadasho tallaalka COVID-19 ah ayaa laga sameeyay Maraykanka laga soo billaabo 14-kii bishii Diseembar 2021, ilaa iyo 17-kii bisha Maajo 2021.

Tallaalada COVID-19 waa kuwa **ammaan ah oo waxtar leh**. Tallaalada COVID-19 waxaa lagu qiimeeyay tobanaan kun oo qof oo ka qeyb galay tijaabooyin caafimaad. Tallaalada waxay ka soo baxeen heerarka sayniska ee adag ee Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka (FDA) ee loogu talagalay badbaadada, waxtarka, iyo tayada wax soo saar ee loo baahan yahay si loo taageero oggolaanshada adeegsiga degdegga ah (EUA). [Learn more about EUAs in this videoexternal icon \(Wax badan oo ku saabsan EUAs ka baro astaantan fiidiyowga ka muuqata\)](#).

Malaayiin qof oo ku nool Maraykanka ayaa qaatay tallaalada COVID-19, tan iyo markii ay FDA u oggolaatay adeegsiga degdegga ah. Tallaaladan waxay soo mareen oo ayna mari doonaan kormeerka dhanka badbaadada ugu wanaagsan ee taariikhda Maraykanka. Kormeerkan wuxuu isugu jiraa adeegsiga habab kormeer badbaado ah oo dagsanaa iyo kuwa cusub labadaba si loo xaqiijiyo in tallaalada COVID-19 ay yihiin kuwa ammaan ah.



## Natijoooyinka waa kuwa shaki la'aan ah

Natijoooyinka ka soo baxa dadaallada kormeerka badbaadada tallaalka waa kuwa la hubo. Dadka qaar wax waxyeellooyin ah ma yeeshaan. Dadka qaar ayaa soo sheegay [side effects after COVID-19 vaccination \(waxyeellooyin tallaalka COVID-19 ka dib\)](#), sida

- barar, gudguduud, iyo xannuun goobta irbadda laga qaatay ah
- qandho
- madax xannuun
- daal
- muruq xannuun
- qarqar
- lallabo

## Dhibaatooyinka daran ee xagga badbaadada waa kuwa dhif ah

Ilaa hadda, nidaamyada jira in lagu kormeero badbaadada tallaaladan waxaa laga helay oo keliya laba nooc oo dhibaato caafimaad ah oo daran tallaalka ka dib, oo labaduba ay dhif yihiin. Kuwani waa anaphylaxis iyo xinjirowga dhiigga oo leh thrombocytopenia syndrome (TTS) ee yimaada ka dib qaadashada tallaalka COVID-19 ee J&J/Janssen.

### Anaphylaxis

Tiro yar oo dadka ah ayaa yeeshay [severe allergic reaction \(xasaasiyad daran\)](#) (oo la yiraahdo "anaphylaxis") markii ay qaateen tallaalka ka dib, laakiin tani waa **mid dhif ah**. Anaphylaxis wuxuu dhici karaa tallaalka kasta ka dib. Haddii ay tani dhacdo, tallaalka bixiyeyaasha waxay hayaan dawooyin loo heli karo in si qaab waxtar leh oo deg deg ah loogu daaweeyo xasaasiyadda.

Marka aad qaadato tallaalka COVID-19 ka dib, waxaa lagu weydiin doonaa in aad joogto 15-30 daqiiqo si lagu eego haddii aad leedahay xasaasiyad daran oo aad u baahan tahay daaweyn deg deg ah.



## **Xinjirowga Dhiigga oo leh Thrombocytopenia Syndrome (TTS) ka dib qaadashada tallaalka COVID-19 ee J&J/Janssen**

Qaadashada tallaalka COVID-19 ee J&J/Janssen ka dib, waxaa jirta khatar dhif ah laakiin ah dhacdo halis ah—xinjirowga dhiigga oo leh platelets hoose (xinjirowga dhiigga oo leh thrombocytopenia syndrome, ama TTS). Haweenka ka yar 50 sano waa in ay si gaar ah ula socdaan halista sii kordheysa ee dhacdadan dhifka ah. Waxaa jira tallaallo kale oo COVID-19 ah oo la heli karo kuwaas oo aan halistan lagu arkin.

Dhacdadan daran waa mid naadir ah, oo ku dhacda qiyaastii 7 qof oo ka mid ah 1-kii milyan ee haweenka la tallaalay ee u dhexeeya 18 ilaa 49 sano. Haweenka 50 jirka ah iyo wixii ka weyn iyo ragga da' walba oo ay ahaadaanba, dhacdadan daran waa mid ku ah dhif iyo naadir.

## **Waxyellooyinka muddada dheer ah lama filayo**

Waxyellooyinka halista ah kuwaas oo keeni kara dhibaato caafimaad oo muddo dheer ah aad ayay u yar tahay in ay dhacaan tallaalka walba ka dib, oo uu ka mid yahay tallaalka COVID-19. Kormeerka tallaalka ayaa taariikh ahaan wuxuu muujiyay in waxyellooyinka guud ahaan ay dhacaan lix usbuuc gudahood marka la qaato tallaalka. Sababtan awgeed, FDA waxay u baahatay in mid kasta oo ka mid ah tallaalka COVID-19 ee la oggolaaday la daraaseeyo ugu yaraan laba bilood (siddeed usbuuc) qaadashada ugu dambaysa ka dib. Malaayiin qof ayaa qaatay tallaalka COVID-19, oo laguma arkin wax waxyellooyin muddo dheer ah.

CDC waxay sii wadi doontaa in ay si dhow ula socoto badbaadada tallaalka COVID-19. Haddii saynisyahannadu ay ogaadaan in uu jiro xiriir u dhexeeyo arrin badbaado iyo tallaalka, FDA iyo soo saaraha tallaalka waxay ka shaqeyn doonaan in ay keenaan xal habboon si wax looga qabto walaaca badbaadada gaarka ah (tusaale ahaan, dhibaato la xiriirta koox gaar ah, arrin ku saabsan wax soo saarka, ama tallaalka laftiisa).



## **Ilaali naftaada iyo dadka kaleba adiga oo is-tallaalaya**

Qaadashada tallaalka COVID-19 iyo raacitaanka [CDC recommendations on wearing masks and social distancing \(talooyinka CDC ee ku saabsan xirashada maaskarada iyo kala fogaanshaha\)](#) ayaa ah qaababka ugu wanaagsan ee aad uga ilaalin karto naftaada COVID-19. CDC waxay kugula talinaysaa in aad sida ugu dhaqsiiyaha badan u qaadato tallaalka COVID-19.

CDC, FDA, iyo hay'adaha kale ee federaalku waxay sii wadi doonaan in ay la socdaan badbaadada tallaalada COVID-19 maadaama ay tallaaladu sii noqon doonaan kuwa si ballaaran loo isticmaalo dadweynaha dhexdiisa.